

Dheef guriyeyn iyo Dheef Cashuur Kawnsal – tilmaamid go'aan-qaadhaso lacag-bixin Guriyeyn

**(Housing Benefit and Council Tax Benefit - a guide to Discretionary
Housing Payments)**

Warqaddan-yare daabacan waxay sharxaysa ooy ku saabsan tahay Go'aan-qaadashada Lacag-bixin Guriyeyn. Qawaaniintu waa heer qaran waana isku mid meelkasta ood ku nooshahay. Haddii aanad garanayn kawnsalka ku shaqada deegaanka aad ku nooshahay, waxad ka heli karaysaa biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka.

Waa maxay Go'aan-qaadasho Lacag-bixin Guriyeyn (DHPs)?

DHPs waxa weeye lacag dheeraad ah oo lagu kabo kiradaada, Cashuurta Kawnsalka ama labadabah, lana siiyo macmiisha dheefta ee u baahan in caawimo dheeraad ah laga siiyo kharashka kirada ee ka sareeya dheefta loo ogol-yahay.

Kawnsalka waxa la siiyaa qadar lacag ah si ay Go'aan-qaadasho ahaan ugu bixiyaan mana kharash-garayn karayaan wax ka badan inta ay Dawladdu u xaddiday.

DHPs **laguma bixin karayo** waxa soo socda:

- Adeeg kharashyo aan lagu daboolin Dheef Guriyeyn
- Lacag kiro ka hadh ah
- Lacag laga gooyo Dheeftaada Guriyeyn ooy ugu wacan-tahay Gunnadaada Shaqo-raadinta oo xanniban
- Marka ay lacag-bixinta dheef Guriyeyn iyo /ama Cashuur Kawnsal la joojiyo
- Kuma bixin karaysid kiradaada haddii aad xaq u leedahay oo keliya Dheef Cashuur Kawnsal
- Kuma bixin karaysid Cashuurta Kawnsalka haddii aad xaq u leedahay oo keliya Dheef Guriyeyn
- Haddii Lacag-dhimidda Waayeelka Labaad ay tahay dheefta qudha ee la bixiyo.

Sidee ayaan u codsan karayaa DHP?

Waxad codsan karaysaa (DHP) haddii aad waqti xaadirka ah xaq u leedahay Dheef Guriyeyn iyo/ama Cashuur Kawnsal. Waxad waydiisataa oo keliya foom codsi Qaybta Dheefta Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Sidee ayeydu u go'aansataan haddii aan heli karayo DHP?

Marka go'aanka la samaynayo waxa la eegaa waxyaabaha soo socda:

- Dakhli-gaaga guud
- In aad haysato lacag kayd ah
- Haddii qof kale oo guriga kula gala uu lacag ahaan kaa caawin karayo
- Haddii ay jiraan wax qaan ama deyn aad weli bixinaysaa
- Haddii aad lacagtaada dib u habayn karayso si ay xaaladda kaaga caawiso
- In aad adigu ama qoys-kaagu leeyihiin wax duruufo khaas ah sida caafimaad-daro ama awood-dari
- In aad isku dayday in aad xaaladda dawo u raadiso.

Waxa lagu waydiin doonaa macluumaad farabadan waxana laga yaabaa in lagu waydiisto in aad timaado xafiiska Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga si codsi-gaaga looga baaraan dego.

Waxad heli doontaa warqad kuu sheegaysa go'aanka iyo sababaha go'aanka. Haddii (DHP) lagu siiyo, waxa warqadda lagugu sheegi doonaa qadarka iyo muddada ay tahay.

Imisa ayaan helayaa iyo muddo intee leeg?

Inta aad helaysaa waxay ku xidhan-tahayduruuftaada. Xaalad kasta waxa loo eegaa gooni waxana loo bixiyaa muddooyin waqti kala duwan. Hase yeeshe, ma jirto wax dammaanad qaadaya in aad dhab ahaan heli doonto.

Fadlan waxad ogaataa, Dheefta Guriyeyn, lacagta lagu siinayaa kama badan karayso kiradaada guud oo laga gooyo qadarka lacaga-yowga adeegyada sida korantada ama biyo, Cashuurta Kawnsalkana, qadarka lacagata lagaaga leeyahay Cashuurta Kawnsalka.

Sidee ayeydu u bixinaysaan (DHP)ka haddii uu arjigaygu guulaysto?

Haddii uu arji-gaagu guulaysto, lacagta Go'aan-gaadashada (DHP) waxa si caadiga la soo raaciyaa wixii Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur KAWnsal aad qaadato, inkasta oonay (DHPs) **ahayn** lacag bixin dheefeed.

Maxaan sameeyaa haddii aan diidanahay go'aanka ku saabsan codsi-gayga (DHP)?

Haddii aad diidan-tahay go'aanka in aan lagu siin (DHP) ama qadarka lagu siiyey ama muddada lagu siiyey, waxad waydiisan karaysaa in go'aanka la eego markale.

Warqad u dir Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga muddo bil gudeheed ah laga bilaabo taariikhda ku taal go'aanka, taasood ugu sheegayso waxa aad go'aanka ku diidan-tahay.

Rafcaan uma qaadan karaysid Adeega Maxkamadda haddii aad diidan-tahay go'aanka in aan lagu siin Lacag-bixin Go'aan Qaadasho.

Ka waran haddii ay duruuftaydu isbedesho?

Haddii ay duruuftaadu isbedesho , waa in aad isla-mrkiiba u sheegto Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Markale ayaa la eegi doonaa Lacag-bixinta Go'aan-qaadasho (DHP) si loo eego bal hadii uu jiro wax isbedel ah oo ku eman karaya lacagta lagu siiyey.

Haddii isbedelku noqdo in lacagta (DHP) ee lagu siiyey la dhimo, waxa laga yaabaa in aad dib usoo celiso qayb ama dhammaan lacagta (DHP) ah ee hore lagu siiyey.

Halkee ayaan ka helikarayaa nasteexo dheeraad ah?

Haddii aad doonayso cawimaad dheeraad ah ama nasteexo, la xidhiidh Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga. (waxad ka heli karaysaa magaca Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka.)

Haddii kale waxad la xidhaaha xafiiska Talo-siinta Muwaadiniinta eek u yaal deegaan-kaaga ama Adeega Xuquuqda Daryeelka. Tafaasiishu waxay ku yaaleen buuga tilifoonada deegaan-kaaga.

Qaabab kale

Waxad ku heli karaysaa macluumaadka ku yaal buugan-yar far waaweyn, far Indhoole, werin cajaladeed iyo luuqado kale. Wixii macluumaad dheeraad ah waxad booqataa websaytka www.benefit-leaflets.org.